Erayga iyo Maanta Somtwt 0099
Marmarsiinyo

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqli jirteen saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **Marmarsiinyada**

Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda, Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Bawlos. Sii dhegayso barnaamijka ka hadlaya **Marmarsiinyada.** Balse intaynaan idiin billaabin aynu wada dhegaysanno qasiiddadan

Song: Reel---Cut---

Haddii aad tahay qof Ilaah ka cabsada, waxaad doonaysaa inaad dadka kale u sheegto wax ku saabsan Masiixa. Markii aad sidaas yeesho, waxaad arkaysaa in dadku ay marmarsiinyo la imaanayaan. Waxaa jira dad hadalkaaga jawaab ka bixinaya, oo si farsamaysan u diidaya markhaatifurka aad bixinayso.

Waxaan ka hadlayaa dadka dunida ee aan jeclayn kiniisadda, waana kuwa xumaan u qaata markii aad Masiixa kala hadasho. Waxay kugu bilaabayaan muran ay doonayaan inay kugu cuuryaamiyaan. Waxaanay cudurdaar farriimaha aad la wadaagayso ama sabab ay ku diidaan; bal aan tusaale kaa siiyo arrinkaas.

Qaar baa waxay kugu leeyihiin: **"Sababta aanan Masiixiga u ahayn waxay tahay inay jiraan dad badan oo laba-wejiileyaal ah."** Miyaad maqashay marmarsiinyadaas? Haddaba cudurdaarkaasi waa mid caadi ah oo ay isticmaalaan. Kuwa aan masiixiyii-nta ahayn ayaa jecel inay farta ku fiiqaan inay

Kiniisadda joogaan dad laba-wejiileyaal ah. Dabcan taasi waa run! Markii ay sidaas ku doodaan jawaabtaadu waa inaad qirato inay Kiniisadda ku jiraan dad laba-wejiileyaal ah, waxaanad ku leedahay, haa waa run oo waa jiraan dad caynkaas ah. Ciise Masiix ayaaba tilmaamay dadkaas intii uu dunida joogay.

Wuxuu yiri, waxaa jira kuwo hadalka maqla, oo u eg sida inay aqbaleen—Laakiin buu yiri Masiixu, Qalbigooda wuu iga fog yahay, waxayna taasi ka mace tahay in qalbigoodu uu ka fog yahay. Waxaa taasu ay ka mace tahay in sheegashadooda masiixinnimada aanay saxiix ahayn iyo inaanay bedelaynin noloshooda, oo sidii ay u noolaan jireen bay u nool yihiin, taasoo muujinaysa in noloshoodu aanay lahayn wax isbeddel ah oo macno leh.

Wax isbeddel ahna laga dareemi maayo dhanka dabiicadda, hadalka, xiriirinta dadka, iyo dhaqankiisa. Noloshiisuna ma lahan raad muujinaya inuu Masiixa u aqbalay sida Badbaadiyihiisa shakhsi ahaaneed. Markaasina, haddii dadka caynkaas ah ay joogaan kiniisaddaha kala duwan, sida Lutheranka, Roman Catholic, Bresbyterian, Methodist amase Baptiska, waa inaan qiranno in dadkaasu yihiin laba-wejiile yaal.

Waa kuwa iska dhigaya inay rumaystayaal yihiin, welibana aan rumaystayaal ahayn. Midse ogaada! Markii dadka aan rumaysnayn hadalka ay kugu yiraahdaan qofkaasu waa laba-wejiile, ama qofkaasu Masiixi maaha –xitaa haddii ay iska dhigayaan, ayaa taasu ka macne tahay inay mar waliba raadsadaan masiixiyiinta weli aan Masiixa ku xoogaysan. Kaba soo qaad qof baa wuxuu daris la yahay qof kale oo xubin ka ah kiniisadda.

Qofkaasina si joogta ah ayuu kiniisadda u yimaadaa, waxaase kaloo uu og yahay in qofkaasi uu mar khiyaameeyey amase uu beenaale yahay. Markaa waxay niyadda iska oranayaan, waxaajira dad kiniisado aada oo iska dhigaya inay Ilaah ka cabsadaan, bal siday dadka u khiyaamaan fiiri. Waa beenaaleyaal dadka khiyaameeya. Waa suuragal in qofkaasi xaqiiqo ahaan laba-wejiile yahay. Laga yaabo in xubinnimada kiniisadda aanay u go'in,oo weli uusan waxba rumaysnayn, oo uu dadka khiyaamo, waayo kuma kalsoona Masiixa. Taasina waa wax suuragal ah ama dhici kara.

Waxaa kaloo dhici kara in ninkanu ahaa qof xagga rumaysadka ka liita oo ah masiixi tabar daran. Qof aan lahayn iimaan xooggan, oo inta uu ku jiro nolol maalmeedkiisa lagu duufin karo inuu qof khiyaano, ama been sheego. Dadkaas oo kale way u nugul yihiin dembiga iyo beenta. Waxaan kaloo ogsoon nahay in masiixiyiintu ay dembiileyaal yihiin weli.

Maxa wacay innagu kaamilnimo weli ma aynaan garin. Waxaa jira dembi badan oo noloshayada ku jira, sababtaas aawadeedna intaan dunida ku nool nahay, waxaa ina duufin kara Shayddaanka. Taasina waxay markhaati wanaagsan u noqonaysaa kuwa kiniisadda neceb ee inagu hareeraysan, kuwaasoo intii ay dabeecad wanaagsan dadka kula dhaqmi lahaayeen, dacaayadda ka jecel.

Haddaba dadka dunidan, kalama jecla kala garan maayaan in qofku yahay masiixi itaal daran iyo mid sheeganaya. Labada siyaaboodba, iyagu waxay ugu yeerayaan qofkaasi labawejiile. Waxay yiraahdaan, **"Dooni maayo inaan qofkaas oo kale noqdo."** Mararka qaarna waxaad maqlaysaa iyagoo leh, **"Dooni maayo inaan qofko qofkaas oo kale ee kiniisadda tegaya,**

oo iska dhigaya sida inay qodduus yihiin, oo wanaagsan yihiin, aniguna waxaan garanayaa sida ay u nool yihiin, waa laba-wejiileyaan khiyaamo badan.”

Markaasina, waxaan u malaynayaa tallaabada kowaa waa inaan oggolaanno innagooleh, **“Haa waa laba wejiileyaal, oo waxaan garanaynaa munaafiqiin kiniisaddajoogta.”** Balse taasi kama dhigna in adiguna aad sidaa noqoto, oo aad been sheegto iyo mid aan rumaysad lahayn, oo aad iyaga naarta u raacdo.

Haddii qofi qar iska tuurayo, adigana maahan inaad iska daba xoorto. Waxaad og tahay inay jiraan dad badan oo kiniisadda jooga oo aan xagga Iimaanka xoog badnayn, iyo kuwo aan wax rumaysad ah lahayn. Laga yaabo inay u imanayaan in xaasaska ama raggoodu ay ku khasbaan amase inay caada raac yihiin.

Way wacan tahay inay kiniisadda joogaan, oo mar kasta waxaan dadka u sheegaa keena kiniisadda asxaabtiinna. Haddii taasi tahay sababta keliya oo ay u imanayaan kiniisadda, kaga mahadcelin inay yimaadeen. Markiise Hadallada Ilaah ay gaaraan, Ruuxa Qodduuska ah ayaa beddelaya, oo waxay helayaan rumaysad.

Markaasina, haddii aad garanayso dad kiniisadda u imanaya is-tustus, waan u mahad celinayaa inay kiniisadda soo gaareen o maqleen oo fursad u heleen Hadalka inuu gaaro. Dadkaasoo kale waxay ku dambaynayaan inay noqdaan dad rumaysad leh. Haddaba, dadka kiniisadda ka soo qayb gelaya ee weli xagga rumaysadka aan ka xoogaysan, ha u diidin imaanshaha Kiniisadda. Waxaase ayaandarro noqonaysa in dadka qaar ay yiraahdaan, maxaa dadka oo dhan loogu baahan yahay?Taaso micno ma leh!

Ilaah wuxuu ina siiyey sharciyadiisa, wuxuuna inoo sheegay waxa ay yihiin. Ilaah waa Qodduus waana Xaq, mana oggolaanayo in qof dembile ah uu galo jannada. Ilaah jannada uma oggola in ruux dembiile ahi soo galo sida adiguba aadan gurigaaga ugu oggolayn in nin khamriyacab ah oo dadka dila uu u soo galo. Kaba soo qaad waxaad leedahay guri aad u dhisatay wakhtiga hawlgabka aad noqonayso, gurigana lacag iyo wakhti badan baa kaaga baxay rinjiyeynta, dhulka, dhismaha, sharxidda, alaabta guriga, fadhi carbeedka, oo si hagaagsan baad gurigaagii u samaysatay.

Markii aad soo gaartay wakhtiga aad hawlgabka noqotay, ayaa waxaa gurigaagii ku soo xoomay dad ciyaala suuq ah, kuwa shar leh, oo dadka caaya oo dhaar badan, markaasay kugu yiraahdeen, guriga naga fur. Waxaad kaloo garanaysaa inay doonayaan oo kaliya inay albaabada fuqsadaan, oo fadhi carbeedka xadaan.

Markaasaad ku leedahay, **"Maya gurigan idinka idiin ma dhisin, idinkana furi maayo waayo dooni maayo inaad iga burburisaan!"** Markaasaad arkaysaa qof kale oo soo socda, mid khamriyacab ah, mid dadka dila, iyo dhowr kale oo faasas wata oo leh, **"War guriga naga fur!"** Maxaad ku oran lahayd? Waxaad ku leedahay, **"Idinkoo kale gurigan uma dhisin si aad u burburisaan, dad idinkoo kale ahna halkan lagama rabo."**

Markaasi Ilaah marnaba oran maayo, **"Waan kaftamayey, qof kasta oo dembiile ahow jannada kaalay, waayo marnaba dooni maayo in halkani qoduus ahaato. Sidaas ayaan jeclaa, laakiin waxaan doortay in qof kasta uu jannada galo."** Haddaba waad ogtahay in Ilaah uusan sidaas yeelayn!

Wuxuu noo sheegay in dembi aan laga aqbalaynin jannada, oo marnaba aan la oggolaan doonin in qof dembi leh uu jannada tago. Waxaa Jannada taalla qoduusnaan, iyo kaamilnimo iyo farxad. Haddii qofi Ilaah u yimaado oo ku yiraahdo, **"Ilaahow dembigii waan ka tegay, waxaanan doonayaa inaan kuu adeego oo kuu noolaado, miyaad I cafinaysaa?"** Dabcan Ilaah wuu cafinayaa dadka caynkaas ah, waayo Ilaah wuxuu doonayaa inay dadku u yimaadaan isaga oo lajoogaan.

Waa Ilaah kan beddelaya oo siinaya hadiyadda bad-baadada. Dabcan wuxuu doonayaa in iyaga la barakadeeyo oo ay ku noolaadaan jannooyinkiisa. Balse ahmiyaddu waxay tahay in la fahmo inay jirto xukun. Waxaa jira cadaab daran oo hubaal ah iyo shaydaan. Dadkana waa inay kala doortaan janno iyo naar. Dadkii Masiixa diiday iyaguna go'aan bay gaareen waayo Ilaah waa xaq.

Wuxuuna horey u sii wadayaa doonistiisa—waa doonista kaamilka ah ee qodduuska ah. Waxaa jiraya xukun la marayo cadaab. Waa dhab haddaba in cadaabi jirto iyo xukun daran, mana ahan ciyaar, waase xaqiiqo la hubo taasoo lagama maarmaan ka dhigaysa in qof kasta u baahan yahay Masiixa si uu ku badbaado. Ciise la'aantiis rajo ma leh, nabaadiinana ha sheegin.

Haddaanu Ciise noloshaada ku jirin, la heli maayo nolosha daa'imka ah, laakiin waxaa qofku ku dambaynayaa cadaab. Dad baa yiraahda, **"Ilaah waa naxariis badan yahay, waxayna la tahay iyagoo dembi leh inay galayaan jannada oo uu marka ugu dambaysa dadkoo dhan uu cafinayo."** Habase yeeshee, Ilaah ciyaar kuma jiro, waana Aamin. Qofkana wuxuu rajo yeelan karaa daqiiqadda u dambaysa noloshiisa haddii uu Ilaah aqbalo.

Waana mucjiso aad u weyn haddii qofi isbeddelo saacadda ugu dambaysa oo uu helo libinta badbaadada. Balse lama ogaan karo in qofi saacadda ugu dambaysa uu badbaadayo. Mararka qaar caasini-madooda ayaa u diidda inay aqbalaan Masiixa iyo inay gartaan doorka u furan ee ah inay raacaan Masiixa. Haddaba Ilaah weyddiiso oo u sheeg inuu siiyo rumaysad uu ku helo nolosha daa'imka ah. Una sheeg inaad ku faraxsan tahay inaad jannada la joogto Masiixa.

SONG: REEL—CUT---

Waxaa intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan toddobaadka dambe (saacadahan oo kale) Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan tel: 0707032060. Farriinta waxaad ka hor-marinaysaan Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060